Somali Public Agenda

# Faallo Kooban 08

# Qiimeyn saameynta COVID-19 uu ku yeeshay jaamacadaha Muqdisho

FARXAAN ISXAAQ YUUSUF

Luulyo 2020

## Soo koobid

Kadib markii kiisaskii ugu horreeyay ee COVID-19 laga xaqiijiyey Soomaaliya, iskuullada iyo jaamacadaha waxaa lagu qasbay in ay xiraan xarumahooda si loo yareeyo faafidda fayraska. Jaamacaduhu waxay sahminayeen waxbarista internet-ka si aanay u joogsan waxbarashada. Faalladan waxay baareysaa sida uu COVID-19 u saameeyay jaamacadaha Muqdisho. Warbixintu waxa ay si gaar ah xoogga u saareyaa u weecashada jaamacadaha ee waxbarista internet-ka; sida culuumta arts-ka, cilmiga bulshada iyo seyniska, tiknooloojiyadda, injineeriyada, iyo xisaabtu u saameeyay COVID-19; arrimaha ku saabsan u sinnaan la'aanta isticmaalka tiknooloojiyadda; dhibaatooyinka maaliyadeed ee jaamacadaha; iyo caqabadaha waxbarista internet-ka; iyo hufnaanta imtixaannada. Faalladu waxa ay ku talineysaa in jaamacaduhu maalgashadaan tiknooloojiyadda; ilaalinta hufnaanta imtixaanka; iyo in la raadiyo ilo dhaqaale kale si loo yareeyo ku tiirsanaanta jaamacadaha ee lacagaha ardeyda laga qaado.

## Ku saabsan Somali Public Agenda

Somali Public Agenda (SPA) waa hay 'ad aan macaash-doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

www.somalipublicagenda.org

© 2020 Somali Public Agenda

## Hordhac

Soomaaliya waxaa si xooggan u saameeyay 'COVID-19'. Fayrasku wuxuu sii murjiyay duruufaha dalka oo markiisii horaba ladaalaa dhacaayay nidaam caafimaad oo liita. Guud ahaan waxa aanan jirin hay'ado dawladeed oo wax-ku-ool ah iyo ilo dhaqaale oo lagama maarmaan u ah la-dagaalanka fayraska.

Kadib markii lasoo tabiyay kiisaskii ugu horeeyay ee fayraska 16-kii Maarso, dowladda federaalku waxay qaadday tallaabooyin ay ku joojineyso faafitaanka caabuqa. Tallaabadii ugu horreeysay waxay ahayd in la hakiyo iskuullada iyo jaamacadaha maadaama ay yihiin goobo uu si xooggan ugu faafi karo fayraska. Raysal wasaaraha dalka Xasan Cali Khayre ayaa ku dhawaaqay saqdii dhexe ee 18-kii Maarso 2020 in labo toddobaad la hakinaayo waxbarashada, loona baahan yahay in la qiimeeyo sida xaaladdu isku baddeleyso. Iskuullada iyo jaamacaduhuna way qaateen amarka, laakiin kiisasku si isdaba-joog ah ayay usii kordhayeen.

Wasiirka Waxbarashada, Dhaqanka iyo Tacliinta Sare ee dowladda federaalka ayaa kulan 8-dii Abriil 2020 la yeeshay hoggaanka ha'yadaha waxbarashada – dalladda iskuullada iyo jaamacadaha – iyo wasiirrada waxbarashada dowlad-goboleedyada si ay go'aan uga gaaraan tallaabada la qaadi lahaa. Wasiirka ayaa ku dhawaaqay in iskuullada ay xirnaan doonaan isla markaana imtixaankii ugu dambeeyay ee ardayda aan ahayn fasalka 12-aad la joojiyay. Wuxuu sidoo kale faray maamulka iskuullada inay qiimeeyaan ardayda iyagoo ku saleynaya natiijooyinka ay heleen imtixaannadii bartamaha sanad dugsiyeedka. Intaa waxaa sii dheer, imtixaanka qaran ee ardayda dhameyneysa dugsigada sare ayaa dib loo dhigay inta xaaladdu iska baddeleyso.

## Isticmaalka fagaarayaasha waxbarashada fogaan aragga ah

Kadib markii ay dhamaatay labadii toddobaad ee hakinta iskuullada iyo jaamacadaha, faafidda fayraska ayaa kor u kacday, taasoo sii yareysay rajadii ahayd in ardaydu ay dib u bilaabaan waxbarashada. Maamulka jaamacadaha waxay ku khasbanaadeen inay la yimaadaan xal hal-abuur leh oo la jaan qaadi kara dhibka jira.

Jaamacaduhu waxay miciin bideen fagaaraayaasha waxbarista internet-ka ah, kuwaasoo noqday sida kaliya ee lagula tacaali karo duruufahaas aan horay loo arag. Tani waxay lamid tahay tillaabooyinka ay qaadeen xarumaha waxbarashada adduunka oo dhan. Jaamacadaha ayaa horay ugu tiirsanaa fasallada tooska ah si ay usoo gudbiyaan borogaaramyada ay bixiyaan. Sidaa darteed, waxbarashada internet-ka waxay uga dhigan tahay jaamacadaha Soomaaliya habshaqo oo cusub. Si kastaba, inta badan dalalka Afrika waa iskumid, maaddaama waxbarashada internet-ka ay ku yar tahay qaaradda sababo la xiriira helitaanka internet-ka, qiimaha sare ee internet-ka iyo saboolnimada baahsan.

Kaabayaasha Isgaarsiinta iyo Tiknooloojiyada Casriga ah ee jaamacadaha Soomaaliya ayaa ah kuwo taag-daran ama aanba jirin iyadoo lala xariirinaayo maal-gelin la'aanta dhanka jaamacadaha iyo taageero la'aanta dowladda ee xagga waxbarashada sare. Jaamacadaha dalka ayaa dhaqaalaha ay heystaan mudnaanta koowaad ku siiyay bixinta mushaaraadka shaqaalaha. Waxaa kale oo jira in aanay kab dhaqaale ka helin ilo gudaha ah iyo kuwo dibadeedba oo ku biirinaya kaabayaasha Isgaarsiinta iyo Tiknooloojiyada Casriga ah ee jaamaacadaha. Tani waxay bannaanka soo dhigtay culeyska xooggan ee soo foodsaaray jaamacadaha markii horaba la'aa dhaqaale iyo xirfado kadib markii waxbarashada internet-ka ay noqotay dariiqa keliya ee shaqeyn kara.

Jaamacadaha kala duwan waxay sameysteen ama qaateen fagaarayaasha waxbarashada internet-ka kala duwan iyadoo la eegayo hadba dhaqaalaha iyo shaqalaaha tiknooloojiyadda ay heli karaan. Sidaa darteed waxay haysteen fursado iyo caqabado kala duwan oo ay kaga gudbi karaan jahwareerka uu COVID-19 keenay. Jaamacaduhu waxay inta badan isticmaalaan saddex madal kulan oo internet-ka ah oo kala ah: Meet Google, Zoom iyo madal kale oo ay naqshadeeyeen Shabakadda Cilmibaarista iyo Tacliinta Soomaaliyeed (SomaliREN), oo ah hay'ad aan macaash doon ahayn oo waxbarashada sare kaalmeysa, si ay u caawiso 20-ka jaamacadood ee xubnaha ka ah.

Fagaaraha Zoom-ka waa midka ugu badan oo ay jaamacaduhu adeegsadaan sababtuna waa in lagu heli karo lacag la'aan. Si kastaba ha noqotee, muddada kalfadhigu wuxuu socdaa 40 daqiiqo oo keliya, waxana uu u baahan yahay in kulanka dib loo bilaabo muddadan kadib. Tani waxay carqaladeyneysaa habsami-u-socodka cashirka, waxaana looga baaqsan karaa oo keliya haddii la bixiyo $15 halkii koonto bil walba. Sidoo kale waxay ku khasbeysaa jaamacadaha in ay kireeyaan tiro koontooyin ah oo lamid ah fasallada islamarkaana ay ku keceyso lacag badan jaamacadaha oo markii horaba dhaqale ahaan dhibbanaa. Dhanka kale,

Meet Google iyo bar kale oo ay sameeyeen SomaliREN waxay soo labeeyaan madasha Zoom, laakiin waxay ku fiican yihin in ay yihiin lacag la'aan iyo waqtiga oo aan xaddidnayn.

Isbaddelkan deg-degga ah ee aan horey loo arag ee wax-ku-barashada internet-ka ayaa waxaa weheliyey caqabado kala duwan iyadoo ay ugu wacan tahay u diyaar-garow la'aanta jaamacadaha, qalabka waxbaridda, macalimiinta iyo ardayda. Marka hore, midkoodna jaamacadaha Soomaaliya ma lahayn barnaamijyo waxbaris oo internet-ka loo isticmaalo, iyagoo horay isugu koobay nidaamka qadiimiga ah ee ah in fasal layimaado. Sidaa daraadeed, ma jiraan agabyo gaar ah oo loogu talagalay wax-ku-barashada internet-ka. Marka labaad, macallimiintu uma tababarna habka wax-ku-gudbinta internet-ka. Tani waxay shaqadooda ka dhigtay mid aad u adag waayo waxbarashada internet-ka iyo falsalkuba waxay u baahan yihiin qaabab kala duwan, agab waxbaris oo caawiya waxbarashada iyo xirfado. Marka saddexaad, macallimiin badan ayaanan lahayn xirfadaha isticmaalka tiknolojiyada casriga ah, taasoo la micno ah inaysan isticmaali karin laptop iyo qalabka la socda ee fududaynaya waxbarista. Si wax looga qabto dhibaatadan, maamulayaasha jaamacadaha ayaa qaaday tillaabooyin iyagoo muuqaal ahaan u duubaya cashirrada macalimiinta kahor waqtigii loo qorsheeyay iyagoo adeegsanaya sabuuradda islamarkaana cashirrada ardayda loo dhigo madashooda.

## Culuumta seyniska ayuu si adag u saameeyay

Inta badan jaamacadaha Soomaaliya waxay siiyaan culuumta STEM oo ka kooban (Sayniska, Tiknooloojiyadda, Injineeriyada iyo Xisaabaadka) ardayda awoodda u leh inay iska bixiyaan lacagta waxbarashada. Barnaamijyada 'STEM' waxay ka dhigan yihiin isha dhaqaaale ee ugu muhiimsan jaamacadaha. U wareegista waxbarashada internet-ka ah waxay daaha-ka-qaadday iimaha barnaamijyada STEM, kuwaasoo ay ahayd inay u keenaan xalal duruufahaan hubaal la'aanta ku dhisan. Macallimiinta barnaamijyadan wax ka dhigta ayaa waxay la daalaa dhacayaan la tacaalidda daldaloollada ka dhashay u wareegista waxbarashada internet-ka. Ma laha tababar iyo qalabka ay heystaan dhiggooda dalalka kale jooga. Waxay noqotay inay iyagu la yimaadaan xalka iyagoo isticmaalaya caqligooda iyo xirfaddooda.

Maadaama ay ka fog yihiin sabuuraddii waqtigii hore ka caawin jirtay fududeynta iyo furfuridda mas'alooyinka, macalimiinta xisaabta iyo fiisikiska waxay ku qasbanaadeen inay isticmaalaan waraaqaha gacanta lagu qoray – oo muujinaya sida mushkiladda loo xalliyo ama halka qaacido laga soo dharaan-dhiriyay – iyadoo dib loosoo dhigaayo madasha ardaydu wax ku bartaan waayo madasha loo isticmaalo ku gudbinta cashirada malahan adeegyo dheeri ah oo daboolayo baahidaas.

Sidoo kale, macallimiinta culuumta caafimaadka iyo injineeriyadda ayaa dhib kala kulmay in aysan heysan muuqaallada wax lagu sharraxo oo lala isticmaali jiray cashirrada si ardayda loo siiyo sawir cad oo ku saabsan mowduuca laga hadlaayo markaas. Waxay ku khasbanaadeen inay ku beddelaan muuqaallo lagasoo dajiyay YouTube-ka. Caadi ahaan, ardayda maaddooyinka STEM laga bilaabo sannadka labaad waxay leeyihiin labo ilaa saddex saacadood oo kamid ah maadooyina takhasuska ah in ay ku qaataan sheybaarka. Tani waxay u oggolaaneysaa inay helaan khibrad gacan-ka-qabasho ah isla markaana la xiriiriyaan cashirradii loo dhigay nolosha dhabta ah. Nasiib darrose, waa ay dhaaftay fursaddan sannadkan beddelkeedana waxay ku tiirsanaayeen buugaagta.

Sababo la xiriira hakadka uu keenay COVID-19 dartood, ardayda shahaaddada koowaad ee sheybarka ayaa kamid ah ardayda sida ba'an uu u saameeyay fayraska maaddaama saacadihii sheybaarka la joojiyay. Saacadahaasi waxay ka dhigan yihiin boqolkiiba konton saacadaha simister-ka . Sidoo kale, tababarkii ardayda caafimaadku qaadan jireen, cabbiraadda dhulka ee ardayda injineerinka iyo booqashada goobaha shaqada ee ardayda cilmiga adeegga bulshada ayaa hakad galay iyadoo qeyb ka ah iskudayga qaran ee lagu doonayo in lagu yareeyo fiditaanka Coronavirus.

Saamaynta taban ee Coronavirus ku yeeshay culuumta kor ku xusan iyo ardaydaba ayaa ah mid aad u ballaaran. Waxay caqabad ku tahay in si habsami leh loo dhameystiro qorshayaashii simister-ka oo ay ku jiraan baraatikadii kuwaasoo qayb muhiim ah ka ah koorsooyinka noocaas ah. Taasi waxay dhaawacday niyadda ardayda dhigata barnaamijyadaan adag. Dhab ahaantii, waxay horseedi doontaa in si dhab ah jaamacaduhu ugu baraarugaan xaaladda liidata ee adeegyadooda dayacan iyo maalgelintooda hooseysa. Tani waa inay ku dhiirrigeliso inay dib uga fiirsadaan istiraatiijiyaddooda, ahmiyaddooda iyo qorshayaalkooda loona qoondeeyaa agab ku filan, tiknooloojiyad iyo maktabadaha dijitaalka ah ee daruuriga u ah waxbarashada qarniga 21-aad.

## Kala qeybsanaanta dijitaalka

Dillaacitaanka Coronavirus wuxuu sii xumeeyey sinnaan la'aanta dhaqan-dhaqaale ee horey uga jirtay bulshada dhexdeeda, dadka ladan iyo kuwa danyarta ah. Wuxuu sii adkeeyay xaaladda bulshada ku nool saboolnimada ee naftooda ku maareeya hal doollar maalintii. Xiritaanka ilahooda dhaqaale ayaa ku khasabtay guryahooda in ay iska joogaan ikhtiyaar la'aan. Xaaladdaasi murugsan waxay kasoo muuqatay dalalka dakhligoodu hooseeyo, oo ay ku jirto Soomaaliya, oo tobankii qof toddobo kamid ahi ay ku nool yihiin saboolnimo (Pape & Karamba, 2019).

U wareegidda aaladaha internet-ka ayaa iftiimisay xaqiiqda kala qeybsanaanta dijitaalka, oo sida uu qabo Turianskyi (2020), ka dhigan helitaanka/faafinta Macluumaadka iyo Tiknoolojiyada Isgaarsiinta (ICT) ee bulshada dhexdeeda oo aan dheelitirnayn. Tani waxay sidoo kale saameyn ku leedahay tirada ardayda ee jaamacadaha kala duwan waana hal cabir oo tilmaamayo sinnaan la'aanta dhaqan-dhaqaale. Arrintan waxay ka hor istaagtay ardayda danyarta ah fursad ay kaga qaybgalaan fasallada ku baxa aaladda internet-ka.Waxay sidoo kale hoos u dhigtay guul-ka-gaaridda waxbarashada waxaana sabab u ah helitaan la'aanta internet-ka, tayada internet-ka oo liidato, kharashka xad-dhaafka ah ee xaddiga internet-ka, korontada oo aan la isku halleyn karin, iyo taleefanno iyo kumbuyuutarro la'aanta. Tani waxay muujineysaa farqiga weyn ee u dhaxeeyo ardayda oo iskumid ahaa marka jaamacada la joogo, taasoo dhigaysa ardayda danyarta ah meel aan habboonayn. Si kastaba ha noqotee, kala duwanaanshahaani kuma eka Soomaaliya oo keliya, waana wax ku badan dalalka ka hooseeya Saxaraha Afrika halkaasoo boqolkiiba 90 ee da'da iskuulka aysan haysan kombiyuutar halka boqolkiiba 82 aysan heli karin khad toos ah (United Nations, 2020).

Sida ay qabaan Bassett & Arnhold (2020), Soomaaliya ayaa kaalinta ugu hooseysa ka gashay dhiggooda Afrika marka loo eego helitaanka internet-ka, oo ah 10% tirada dadka. Inkastoo ardayda ku nool magaalooyinka Soomaaliya laga yaabo inay ku jiraan dadka awoodo helitaanka internet heer sare ah, haddana waxaa muuqata in arday badani ay dhibaatooyin kala kulmaan sidii ay ku heli lahaayeen waxbarashada internet-ka lagu bixiyo maaddaama aysan haysan kumbiyuutarro/taleefanno casri ah ama internet u saamaxayo qaadashada xiisadaha.

Inta badan ardaydu waxay heystaan taleefanno casri ah – laptop ma heystaan –, laakiin tiro badan oo ardayda saboolka ah ayaanan haysan taleefano casri ah. Haddii ay xitaa heystaan taleefannada casriga ah, arday badan oo sabool ah ayaanan awoodi karin inay iibsadaan xidhmada internet-ka ee maalinlaha ah qiimaha oo sareeya owgeed. Tusaale ahaan, 1 GB oo xidhmada internetka ah waxey ku kacaysaa hal doollar, waxaana la isticmaali karaa afar iyo labaatan saacadood keliya. Si kastaba ha noqotee, Soomaaliya waxay leedahay qaar kamid ah qarashka xidhmooyinka ugu jaban ee taleefanka gacanta ee Afrika iyo adduunka. Qiimaha xidhmooyinka ayaa culeys ku ah ardayda saboolka ah sababtoo ah waxaa laga rabaa inay isticmaalaan internet-ka qiyaastii saddex ilaa shan saacadood maalintii, taasoo ku xiran koorsada baxeyso. Waxay ku kalliftaa ardayda qayb kamid ah inay raadiyaan qaabab kale sida inay aadaan guryaha ehelka ama saaxiibbadood ee leh Wi-Fi si ay uga galaan fasallada. Si kastaba ha noqotee, waxaa bogaadin mudan in qaar kamid ah shirkadaha bixiya adeegga internet-ka ay maalin walba siiyaan ardayda xirmooyin waxyar ka jaban taasoo ka jawaabaysa baahida sii kordheysa ee ardayda ee helitaanka internet-ka. Laakiin weli ardayda way ku adag tahay iibsashada xidhmooyinka internet-ka had iyo jeer maaddaama culeyska dhaqaale ee qoysaskooda ay kasii dartay iyadoo ay ugu wacan tahay hoos-u-dhaca ku yimid dakhliga gudaha iyo xawaaladaha.

Waxyaabo kale oo carqaladda keenaya ayaa kaga hor gudban helitaanka waxbarshada fog ardayda aan dhaqaalaha fiican heysan. Ardayda saboolka ah ee ku nool duleedka Muqdisho waxay la kulmaan khad xumo iyo hawada taleefannada oo aan xasilloonayn, mararka qaarkoodna waa la hakiyaa sababta oo ah shirkadaha waaweyn ee korontada masoo gaarin aagagga dadku ku yar yihiin.

Intaa waxaa sii dheer, ardayda ku tiirsan mobilladooda si ay u qaataan cashirrada waxey la kulmaan arbushaad joogto ah marka ay fasalka ku jiraan waxaana sabab u ah wicitaannada soo galaya ee keenaya carqalad iyo mashquul. Ardeyda hodanka ah waxey la kulmaan dhibaatooyin aad u yar marka ay ka isticmaalayaan Wi-Fi internet kumbiyuutarka, waxayna awoodaan inay si habsami leh ula socdaan macallimiinta iyagoon waxba dhaafin. Marka loo barbar dhigo taleefannada casriga ah, laptop-yada guud ahaan waxay leeyihiin naqshad iyo howl qabad wanaagsan oo loogu talagalay ka qaybgalka muxaadarooyinka iyo sameynta daraasad madax-bannaan.

Kala qeybsanaanta dijitaalka ah owgeed, waxbarashada internet-ka lasoo marsiiyo waxay u muuqataa inay u roon tahay ardayda ladan, sidoo kalena ay faa'iido darro u tahay dhiggooda saboolka ah kuwaasoo horey u dareemayay culeys xagga lacagaha wax-lagu-barto ee jaamacadaha iyo kharashaadka kale ee lamidka ah sida lacagta bas-raaca iyo iibsadhada buugaagta. Tani waxay cawaaqib xumo ku keentaa guulaha waxbarasho ee danyarta, waxayna u horseedi kartaa in ay isaga haraan tacliinta.

## Dhibaatooyinka dhaqaale

Fayraska coronavirus wuxuu u horseeday dhibaato dhaqaale waxbarashada sare ee adduunka oo dhan, iyo sidoo kale jaamacadaha Soomaaliya. Fayraskan wuxuu ugasii daray tacliinta sare oo markii horeba liidatay iyo jaamacado ku sugnaa xaalado murugsan oo badanaa laga dhaxlay burburka dowladnimada Soomaaliya.

Dhammaan jaamacadaha marki laga reebo hal jaamacad oo ah Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed – oo ah jaamacadda keliya ee dowladeed oo ku taal Muqdisho – ayaa ku tiirsan khidmadaha waxbaridda ardayda si ay u daboolaan kharashaadkooda howlahooda, mushaaraadka macallimiinta iyo shaqaalaha, kirada iyo adeegyada kale. Ma haystaan ama way yar tahay dhaqaalaha kale oo ay ku tiirsanaan karaan si ay usii wadaan howlahooda xilliyada dhibaatooyinka jiraan.

Dhibaatadan ayaa jaamacadaha ku tuurtay xaalad aan la saadaalin karin waxayna saameyn ku yeesheen howlahooda. Waxay curyaamisay lacagta kasoo xaroon jirtay ardayda saboolka ah ee aan awoodin inay bixiyaan khidmadda saamaynta dhaqaale ee qoysaskooda soo gaartay owgeed. Waxaa kamid ah arday ay xubno ka tirsan qoyskooda ku nool yihiin qurbaha oo qayb ka qaadan jiray bixinta lacagta ardayda laakiin ay saameeysay bandowga ka jira dalalka ay ku nool yihiin.

Markii uu yaraaday dakhligu, qaar kamid ah jaamacadaha magaalada Muqdisho ayaa qaaday tallaabooyin kala duwan oo looga jawaabayo dhibaatooyinka uu sababtay COVID-19. Tallaabooyinkan ugu muhiimsan waa mushaar dhimis, shaqo-ka-fadhiisin, dib-u-dhigidda bixinta mushaharka iyo saacadaha dheeraadka ah oo la dhimay si loo yareeyo kharashka. Qaarkood waxay sameeyeen 30% dhimis mushaarka macallimiinta iyo shaqaalaha kale kadib markii ardayda bixin waayeen lacagaha waqtiga loogu talagalay. Qaar kale waxay sidoo kale shaqada ka joojiyeen shaqaalaha aan muhiimka aheyn kadib markii ay waayeen qeyb kamid ah maalgelintii ay ka heli jireen ururrada samafalka ee dibadda. Ururrada samafalka ayaa laftoodu la il-daran saameynta maaliyadeed ee cudurkan kadib xannibaadda deeq-bixiyeyaasha iyo sare-u-kaca baahida kaalmo ee dhanka gudaha.

Sidaas awgeed, dhaqaale ahaan COVID-19 ayaa si daran saameeyay jaamacadaha yaryar oo leh arday iyo dhaqaale aan badneyn. Jaamacadahani masoo xareeyaan lacag badan sababtoo ah waxay ugu horreyn soo jiitaan ardayda saboolka ah ee aan bixin karin lacagaha jaamacadaha kale, laakiin doonaya inay sii wataan waxbarashada sare iyadoo loo marayo 'deeq waxbarasho'. Waxay ardayda ka qaadaan lacag la yiraahdo ‘other charges’ si ay iskaga dhigaan arday bixinaya khidmada. Ardayda waxa ay sido kale iska bixiyaan lacagta daabicidda buugaagta ee ardayda si ay jaamacadda dakhli uga hesho kana caawiyaan bixinta mushaaraadka macallimiinta iyo kharashaadka kale.

Dhinaca kale, jaamacadaha waxaa u baaqday kharashyada joogtada ah sababtuna waxey tahay u weecashada dhanka barashada qaabka online-ka ah, tusaale ahaan kharashka shidaalka, kharashaadka adeegyada yaryar, cabitaanka macallimiinta, biyaha la cabbo iyo qalabka nadiifinta. Kharashkan baaqday waxay qayb ahaan u isticmaali karaan hoos-u-dhaca ku yimaada ilaha kale ee dhaqaale.

Macallimiinta ayaa ah dhibanayaashii ugu horreeyay ee fayraska, maaddaama mushaharkoodii hore uu hoos-u-dhac iyo dib-u-dhac ku yimid. Waxaa intaa dheer, waxay helayaan mushaar aan u dhigmin culeyska waxbaridda, dejinta iyo sixitaanka imtixaannada.

Jaamacadaha Soomaaliya keliya maahan kuwa caqabadaha la kulmay, laakiin kuwa dalalka deriska ah iyo kuwa ka baxsanba waxay la tacaalayaan saameynta dhaqaale ee degdegga ah ee COVID-19. Waxay codsadaan taageero maaliyadeed oo deg-deg ah si looga caawiyo buuxinta ilahoodii dhaqaale iyo in ay joogteeyaan adeegyada ardayda. Si kastaba ha noqotee, baaqooda lama maqlin sababtoo ah dowladaha waxaa ka tan badiyay COVID-19 oo ay mudnaanta koowaad siiyaan una qoodeeyaan dhaqaale dhinacyada gurmadka caafimaadka guud, iyo noocyada kale ee ganacsiyada ee waqtigan adag.

## Caqabadaha waxbarista online-ka

Degdegta, lama-filaanka iyo isu-diyaarinta la’aanta wax ku-gudbinta waxbarasha khadka tooska ah ee internet-ka ayaa caqabado balaaran ku keentay hay'adaha waxbarashada sare ee Soomaaliya, macallimiinta iyo ardayda. Inkastoo caqabad tani lamid ah ay wajahayaan dhammaan ha’yadaha waxbarasho ee adduunka oo dhan, balse xaaladda Soomaaliya waxaa sii murgiyay caqabado badan oo culayskooda leh ee uu dalku horay u wajahayay.

Ugu horreyntii, jaamacaduhu ma lahayn (walina malaha) kaabayaal ICT oo la taaban karo shaqo ahaana gacan ka geysan kara bilaabista waxbarista online-ka. Qaadashada nidaamka waxbarista ee online-ka waxay aad ugu adkaatay jaamacadaha kuwaasoo ku shaqeeya dhaqaale aan badnayn. Islamarkiiba, waxay billaabeen jaamacaduhu inay shirar ku qabtaan online-ka iyo isticmaalka nidaamyo wax lagu dhigo si online ah ayadoo barayaashu aysan helin tababaro qoto-dheer oo u fududayn kara ardayda inay la qabsadaan nidaamka cusub amaba ay ka fekeraan xal kale oo fududayn kara sii wadista casharrada. Waxaa caddaatay in tiro badan oo macallimiinta ah ay yaqaannaan keliya dhigista buugaagta. Sidaas darteed, macallimiin badan ayay ku adkaatay la qabsiga tiknoolojiyadda cusub. Tani waxay culeys saartay kulliyadaha ay quseyso si ay kaalmada ku habboon u siiyaan barayaasha jamacadaha si aysan ardayda uga joogsan in waxbarashadooda loogu gudbiyo qaab online ah.

Marka labaad, macallimiinta lahaa laptop-yada, qaar baa la kulmay dhibaatooyin ku saabsan raadinta iyo isticmaalka sida ugu habboon ee looga faai’daysan karo aaladda la isticmaalayo. Aqoon la'aanta nidaamka waxbarista ee internet-ka ayaa la macno ah in barayaashu mararka qarkood wax u bixiyaan qaab aan xirfadaysnayn. Tusaale ahaan, xubnaha qoyska ayaa laga yaabaa inay kasoo muuqdan kaamerada macallinka ayagoo aan ugu talagalin ama in hoyga ay joogaan uu mararka qaarkood ka jiro sawaxan carqaladayn kara waxbarista. Intaas waxaa sii dheer, barayaasha aan xirfadda badan u lahayn waxbarista online-ka waxay dhib ku qabaan maaraynta ardayda aan aaladaha ay isticmalayaan aan mute ama aamusnaan saarin xilliga daraasaddu socoto, tani waxay caqabad ku tahay ardayda kale ee sida habboon ula socda casharrada.

Midda Saddexaad, barayaasha ku nool guryaha ciriiriga ah (iyo guryaha dadka badan joogaan) ayaa dhib ku qaba gudbinta casharrada si habsami ah maadaama buuqa iyo qaylida carruurta ku hareeraysan ay carqaladeynayso gudbinta casharka. Sidoo kale, kuwa ku nool guryaha jiingada ah badi waxay la kulmaan caqabado lamid ah kuwa aan soo sheegnay, ama mararka qarkood dhawaaq kasii weyn.

Midda afaraad, waxaa luntay is-dhexgalka shaqsiyadeed, tacaamulka ardayda iyo macalimiinta iyo la-socodka guud ee macaliminta indhaha ku kormeeri jireen ardayda. Tani waxay fursad u ahayd macalimiinta si ay ula socdaan ardayda sida dhabta ah ugu hawlan waxbarashada iyo kuwa kale. U wareegista waxbarista online-ka ee internet-ka ayaa ka dhigtay nidaamka waxbarashada in hal qaab oo midaysan casharada lagu gudbiyo ayadoo xiriirkana noqday mid hal dhinac oo inta badan ka imaada dhanka macalimiinta.

Midda shanaad, barashada online-ka ah waxay sii fududaysay in macallimiintii lumiyaan gacan-ku-haynta dabciga hab-dhaqanka ardayda marka laga hadlayo imaanshaha fasalka. Waxay ardayda ku wareejiyeen mas'uuliyadda soo xaadiritaankooda. Tani waxay dhalisay maqnaansho aad u sarreysa ee ardayda. Mararka qaarkood, tan waxaa lagu sababeyn karaa internet xumo, korontada oo maqan, qadka telefoonka oo aan fadhin (culees ah) iyo in aysan awoodin in ay lacag ku shubtaan internet-ka si ay u isticmalaan. Waqtiyada kale, sababaha ayaa umuuqda kuwo aan macquul aheyn, sida aan ka ogaannay macalimiin badan.

Ugu dambeyntiina, ardayda qaar ayaa qadka soo gala xilliga darasaadka ayagoo suuqa ku sugan ama maqayadaha jooga taasoo sababta in cod-baahiyeyaasha agabkooda uu soo gudbiyo sawaxan dheer oo carqaladeeya darasaadka socda. Macallimiintu waxay darseen in qayb kamid ah ardayda ee soo gala fasalka ay u muuqdaan kuwa online ah. Laakiin markii macallimiinta u yeeraan si ay u hubiyaan inay maqli karaan oo ay la socdaan casharka ayaa in yar oo kaliya ka jawaabtaa. Waxay u muuqataa in qaar badani aysan si dhab ah uga qayb ahayn darasaadka online-ka laakiin usoo galaank qadka si ay xaadiritaankooda u xaqiijiyaan ayagoo hawlahooda kale iska wata.

## Hufnaanta imtixaanka

Markii la qaatay habka waxbarista ee internet-ka, caqabad waxaa noqotay sida loo maareynayo imtixaannada. Tani waxay dhalisay su'aalo ku saabsan cadaaladda iyo isku-halleynta natijooyinka imtixaannada lagu qaado online-ka. Jaamacaduhu waxay go'aansadeen in imtixaannada lagu qadaayo qaab online ah iyagoo isticmaalay aalado kala duwan si ay u qadaan imtixanadda xilliga-dhexe iyo kuwa dhammaadka ee maaddooyinka. Tani waxay ka hor imaaneysaa go'aannada jaamacadaha adduunka oo dhan oo leh awoodda isticmaalka alaadaha tiknolajiyadaha casriga ah inay dib-u-dhigaan ama gabi ahaanba joojiyaan si ay uga fogadaan cilladaha ka imaan karta imtixaannada lagu qaado qaabka online-ka ah.

Sikastaba ha noqotee, intooda badan jaamacadaha gaarka loo leeyahay ee Soomaaliya dib uma dhigi karaan ama ma joojin karaan imtixaannada semester-ka. Sababta ugu weyni waxay tahay in imtixaannadu ay fursad muhiim ah u yihiin jaamacadaha si ay ugasoo ururiyaan ardayda aan khidmadaha bixin lacagta lagu leeyahay. Lacagahan ayaa muhiim u ah jaamacadaha si ay u shaqeeyaan, sidaas darteedna waxay door bideen inay imtixaanka ku sameeyaan khadka tooska ah. Si kastaba ha noqotee, tani waxay halis galisay sharaftooda iyo cadaaladdooda sababtoo ah ardayda ayaanan lahayn ilaalo adag ee kuliyadaha. Tani waxay ardayda u oggolaaneysaa inay tixraacaan agabkooda waxbaridda, isbarbar dhigaan jawaabaha, iyo inay iska caawiyaan midba midka kale inuu ka jawaabo su'aalaha iyadoo loo marayo aaladaha sida WhatsApp-ka.

Jaamacado kooban ayaa isku dayay inay ka horjoogsadaan ardayda iskudayda qish iyagoo ku jira imtixaan online ah. Balse tani waxay u baahan tahay oggolaanshaha ardayda si ay u furaan kaamiradooda bilowga imtixaanka, ayna sidaas ku daayaan, wax wicitaan ahna aysan samayn amaba aysan isticmaalin telefoonkooda illa ay kasoo gudbiyaan jawabaaha imitixaanka. Tani waxay fududaynaysaa in lala socdo waxqabadka ardayda, iyo haddii uu u hoggansami waayo hannaankaas in natajiida imtixaankiisa la baabi'yo. Sikastaba ha noqotee, khiyaameynta imtixaannada ee ay ardaydu ku samayso online-ka ayaa ah mid cad sida ay macalimiinta iyo ardaydu sheegeen. Tusaale ahaan, ardayda fasalku waxay iskugu imaanayaan guri gaar ah maadama ay rabaan inay ka wada shaqeeyaan maaddada markaas imtixaankeeda la qaadayo. Qaar kale waxay sameeyeen WhatsApp group si ay isula wadaagaan jawaabaha imtixaanka islamarkiiba. Tani waxay sababtay in ay carqaladayso hufnaanta imtixaannada iyo darajo-siinta ardayda si cadaalad ah. Waxay sidoo kale niyad jabinaysaa ardayda dadaalaysa, sida hufanna wax-u-barta maaddama kuwa cajiiska badan ee darajooyinka sare keenin imtixaanka ay sababayso inay isku darajo keenaan.

Qaadista imtixaannada online-ka ah keliya ma aysan dhaawicin hufnaanta imtixannada balse waxay sii qoto dheereeysay kala qeybsanaanta dijitaalka ah ee ka jirta Soomaaliya. Arday badan ayay caqabad ku noqotay inay imtixannadooda online ku galaan maaddama aysan haysan internet, kombiyuutar ama aalad kale oo u fududayn karta adeeggaas. Mobile-ku ma ahan agabka ugu habboon ee loo isticmaali karo imtixaannada online-ka ah, sababta ugu badan ee culeeska keentayna waa inuu internet-ka inta badan yahay culees iyo in adeegyo badan oo dhanka mareegta ah aan si hufan telefoonka looga isticmaali karin. Middaas ka sokow, ardaydu guud ahaan waxay la kulmaan caqabado xagga imtixaannada online-ka oo ay ugu horrayso xirfaddooda kombiyuutar wax-ku-qorista oo aan xoogganayn taasoo sababta inaysan kala badh su'alaha ka jawaabin kuwa ay ka jawaabaanna aysan si hagaagsan oo dhamaystiran uga jawaabin.

## Talooyin tixgelin mudan

1. Jaamacaduhu waa inay isku dayaan inay u qoondeeyaan qayb kamid ah dhaqaalahooda maalgalinta nidaamyada casriga ah ee waxbarasho (sida nidaamyada maaraynta waxbarashada ee online-ka). Tani waa lama huraan casrigan la joogo, waxayna fududeyn kartaa in si garbo siman la isugu wado nidaamkii hore ee waxbarasho oo lagu xoojiyay nidaamyada casriga ah. Maalgashiga noocan oo kale ah wuxuu fursad u siinayaa arday badan oo aanay suurogal u ahayn inay jamacadaha yimadaan maaddaama ay reerahooda u shaqeyaan.

2. Jaamacaduhu waa inay dhawraan tayada iyo hufnaanta imtixaannada ayagoo markasta xallinaya cilladaha kasoo ifbaxa imtixaannada online-ka lagu qaadayo. Hadii aan la xalin, tani waxay khatar gelin kartaa kalsoonida iyo aaminaadda lagu qabi karo jaamacadaha. Haddii hufnaanta imtixaanka ay su'aal ka taagan tahay, jaamacaduhu waa inay tixgeliyaan dib-u-dhigista imtixaannada si loogu qaado xarumaha jaamacadaha.

3. Bixiyeyaasha adeegga internet-ka waa inay ka caawiyaan ardayda jaamacadaha qeybtooda iyagoo bixinaya internet qiime jaban oo lagu caawinaayo ardayda aan awoodin inay iska bixiyaan kharashkaas si ay waxbarashdooda usii wataan.

4. Si loo yareeyo ku tiirsanaanta guud ee jaamacadaha ee ku aaddan khidmadaha laga qaado ardayda keliya, Dowladda Federaalka Soomaaliya waa in ay siisaa kabis jaamacadaha mana ahan in ay ku koobto teegaradaas jamcadaha dowladda keliya. Sidoo kale, jaamacaduhu waa inay raadiyaan ilo kale oo ka baxsan lacagta laga qaado ardayda si aanu hawlahoodu u joogsan.

5. Jaamacadaha waa in ay ka faa'iideystaan fursada uu COVID-19 u abuuray oo ay baaxadda shaqadooda kordhiyaan si ay nidaamkooda waxbarasho uga faai'daystaan ardayda meelaha kale ee Soomaaliya jooga ee aan awoodin in darasaadka fasalka yimaadaan sababo kala duwan awgood. Intaas waxaa sii dheer, Jaamacaduhu waa inay isla wadaagaan khibradaha iyo fikradaha ku saabsan sida ugu wanaagsan ee waxbarista online-ka loo sameyn karo.

## Tixraac


Bassett, R. M., & Arnhold, N. (2020, April 30), *COVID-19's immense impact on equity in tertiary education*. Retrieved from World Bank: https://blogs.worldbank.org/education/covid-19s-immense-impact-equity-tertiary-education

Ministry of Education (2020, April, Somalia Education Sector COVID-19 Response Plan.

Pape, U., & Karamba, W. (2019, December 9), *From data to development: Poverty and policy in Somalia*. Retrieved from World Bank: https://blogs.worldbank.org/africacan/data-development-poverty-and-policy-somalia

Turianskyi, Y. (2020, May 14), *COVID-19: Implications for the 'digital divide' in Africa*. Retrieved from Africa Portal: https://www.africaportal.org/features/covid-19-implications-of-the-pandemic-for-the-digital-divide-in-africa/

United Nations. (2020, April 21), *Startling disparities in digital learning emerge as COVID-19 spreads: UN education agency*. Retrieved from https://news.un.org/en/story/2020/04/1062232



Turjumidda Af-Soomaaliga waxaa sameeyay

TAYO TRANSLATIONS